



## Waan taageernaa ardaydeena DACA

Qoysaska iyo Shaqaalaha PPS ee Qaaliga ah,

Go'aankii dhawaan la gaaray ee lagaga noqonayay ilaalinta la isku siiyay barnaamijka Hakinta Talaabo Ka Qaadida Carruruuta Timid "Deferred Action for Childhood Arrivals", ama DACA, waa sababta keentay dareen qoto dheer oo ka jira Dugsiyada Dadweynaha Portland. Waxay cawaaqib xun u yeelan kartaa qaar ka mid ah ardaydeena.

"Riyoodayaashan" waa carruurta iyaga oo yar yar ay waddankan keeneneen waalidiintooda, iyada oo kuwa badan oo ka mid ah ay tani tahay waddanka keliya ee ay yaaqanaan. Waxay u baahan yihii oo u qalmaan waxbarashada ugu fiican ee aan bixin karno. Wuxaan taageeradayaada ugu badan siinnaa ardaydaan iyo qoysaskooda.

Waxaan rabnaa in aan dhammaan ardaydeena iyo qoysaskeena oo dhan xusuusino in, iyada oo la raacayo Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Gaar ahaanshaha, aynaan bixin doonin maclumaadka xaaladda muhaajirnimo ee ardaydeena. Sidoo kale shaqaalahayagu ma weydiin doonaan wax arday ah xaaladda muhaajirnimo.

Tan iyo 2012-kii, markii Madaxweyne Barack Obama uu abuuray DACA isaga oo isticmaalaya amar madaxweyne, barnaamiju wuxuu ilo rajo iyo xasilooni u keenay ardayda meel kasta joogta, oo ay ka mid tahay PPS. Wuxuu u oggolaaday in ay sii wataan waxbarashadooda, xirfadahooda iyo riyooyinkooda iyaga oo aan ka cabsi qabin in la masaafuriyo. Joojinta barnaamiju waxaa laga yaabaa in uu carqalad weyn u u keeno noloshooda isla markaana uu ka dhigo mid aad u adag in ay caluyska saaraan hadafkooda waxbarasho.

Hoggaamiyaha PPS ahaan, waxaan rabnaa in aanu mar labaad ku celino ballanqaadkayaga abuurista jawi waxbarasho iyo badbaado leh oo loo dhan yahay oo loogu talagalay dhammaan ardaydeena iyadoo aan la eegayn asalka, jinsiga, dookha galmo, diinta, qowmiyadda ama xaalada deganaansho. Ka laaban mayno ballanqaadkaasi, iskasta oo uu jiro go'aankani. Go'aanka la gaaray ee lagaga noqonayo DACA, ee ay la socdaan dhacdooyinka kale ee biliihii la soo dhaafay, waxay keeni kartaa in qaar ka mid ah ardaydu ay fasalka yimaadaan iyaga oo qaba cabsi dhab ah oo ku saabsan sida loola dhaqmi doono. Tani waxay xusuusin u tahay in aanay jirin meel ka tirsan PPS oo lagala kulmayo takoorid nooc kasta.

Macallimiin ahaan, waxaan fikradahaan gelinaa qalbiga, anaga oo dhacdo kasta oo takoorid ah, xoog isku muquunin ama dhibaatayn ah ula dhaqana si dhab ah. Aanu noqoto kuwo ujeedo leh si ay ardaydeena ugu lug yeeshaan siyaabo u horseedaya in ay fikiraan, naxariis iyo ixtiraam u yeeshaan ardayda ay isku fasalka yihii.

Guddi ahaan, waxaan sinnaanta iyo ka mid noqoshada ka dhignay qayb ka mid ah hawshayada, aragtidayada iyo hadafkayaga sababtoo ah waxaanu rabnaa in arday kastaa uu heli karo waxbarashada ugu fiican, isla markaana barwaqaqo ku gaaro meel taageeradooda la qiimeeyo. Mustaqballoodaa waa mustaqbalkeena.

Waxaan rabnaa in dhamaan ardaydeenu ay dareemaan ammaan, si ay wax ugu bartaan fasal soo dhaweyn leh isla markaana aanay ka cabsan in ay yeeshaan riyo.

Julia Brim-Edwards, Guddoomiye, Guddiga PPS

Antonio Lopez, Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Wax qabadka Dugsiga

Dr. Van Truong, Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Ku Meel gaarka ah ee Wax baridda iyo Waxbarashada